



## Qorsheynta Daryeelka Hore: Maxay tahay POLST?

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

# Qorsheynta Daryeelka Hore: Maxay tahay POLST?

## Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

In aad habsatid in takhtarkaada iyo kuwa aad jeceshahay ogsoon yahiin nooca daweynta iyo daryeelka aad dooneysid ama aadan dooneynin marka la gaaro dhamaadka noloshaada waa muhiim. Waxaa kaloo muhiim ah in la bilaabo wadahadaladaan waqti hore iyo in la qoro rabbitaankaada inta aad nooshahay. Hase ahatee, haddii aad si culus u xanuunsan tahay kaddibna laguugu tilmaamay cudur soo kooba nolosha, waxaa jira foom khaas ah oo lagu magacaabo POLST.

**Maxay tahay POLST?** POLST waa foom loogu talagalay dadka qaba xanuunka nolosha soo kooba kaasoo uu saxiixo bixiyehooda. POLST wuxuu sheegaa waxa qofka jecel yahay ee la xariira daweynta caafimaadka ku sii socota dhamaadka nolosha.

**Maxay POLST u taagan tahay?** POLST waxay u taagan tahay Ammarada Bixiyeha Daweynta Taakuleynta Nafta.

**Yaa dhamaystira foomka POLST?** Foomka waxaa dhamaystira adiga iyo bixiyehaada\*. Si foomka u shaqeeyo, waa in uu saxiixo bixiyehaada. Waxaa si xooggan loogu dhiirigelinaa saxiixa bukaanka ama wakiilka daryeelka caafimaadka.

**Maxaa loola jeedaa macnaha Daweynta Taakuleynta Nafta?** Daweynta taakuleynta nafta ma baddasho ama ma taageerto jirka shaqadiisa gabo. Bixiyeyaasha caafimaadka waxaa laga rabaa in ay iskudayaan daweynta taakuleynta nolosha haddii uusan jirin ammar ka soo baxay caafimaadka oo sheega waxa aad rabtid, sida POLST.

## \*Bixiyeyaasha" POLST

Xagga POLST, Minnesota, "Bixiye" waxaa loola jeedaa takhtarkaada, kalkaaliyaha aqoonta sare, ama kaaliyaha takhtarka.



**Yaa loo baahan yahay in uu haysto foomka POLST?** Go'aanka in aad qaadatid foomka POLST waa wax aad adiga dooratid, hase ahaatee waa wax uu ka fa'iideysan karo qof kasta oo lagu tilmaamo in uu qabo xanuun soo kooba nolosha. Tusaale ahaan, dadka lagu daryeelo guryaha daryeelka, kuwa ku nool guryaha kalkaalinta, ama isticmaala wakaaladaha daryeelka guriga waa in ay weydiiyaan bixiyehooda sida loo dhamaystiro POLST.

**Maxay tahay sababta aan ugu baahanahay POLST?** Foomka POLST wuxuu kuu ogolaadaa in aad soo jeedisid waxa aad jeceshahay iyo rabbitaankaada ku saabsan daweynta taakuleynta nolosha. Tani waa muhiim maxaa yeelay waxay kugu dhiirigelisaa in aad ka fakartid daweynta iyo waxyeelada ay gaarsiin karto tayada iyo tirada noloshaada. In aad hubsatid in kuwa aad jeceshahay iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ogsoon yahiin waxa aad rabtid waxay yareyn kartaa walwalka suurtoogalka ah iyo dhibka haaysa qoyskaada.

**Ma baddali karaa rabbitaankeyga sida ku qoran foomka POLST?** Haa. Waxaad baddali kartaa ama ka dhigi kartaa wax aan jirin POLST waqti kast, adiga oo bixiyahaada ka codsada in uu buuxiyo foom cusub oo laga helo tilmaamo ka duwan.

## POLST vs. Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

POLST waa kabid, ma baddasho dardaaranka daryeelka caafimaadka. Haddii aad qabtid xanuun culus, waa in aad ku fakartid in aad haysatid labadaba.

	POLST	Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka
Maxay tahay?	Ammarka Caafimaadka	Jidka uu maro qofka; oraahda rabbitaanka bukaanka
Xaggee ayaan ka bilaabaa?	Wadahadalka ka dhexeeyo adiga iyo bixiyahaada	Wadahadalka ka dhexeeyo qofka iyo qoyska/kuwa uu jecel yahay
Yaa loogu talagalay?	Si culus u xanuunsan oo qaba xanuun soo yareeya nolosha	Qof kasta oo jira 18 sanno ama ka badan
Goormaa ayay hirgeli doontaa?	Kaddib marka la saxiixo, waxay hirgashaa isla markiiba iyadoo aan la fiirin awoodda go'aan gaarista	Wuxuu shaqeeyaa oo keliya marka bukaanka lumiyo awoodda go'aan gaarista

### La xariir MNHPC

Wac telefoonka (651) 917-4616 ama booqo [www.mnhpc.org](http://www.mnhpc.org) haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah sida loo helo bixiyeyaal ama haddii aad qabtid su'aalo guud oo ku saabsan POLST aad adiga dooneysid ama aad u dooneysid kuwa aad jeceshahay.